

## WAAXDA CAAFIMAADKA VERMONT

### MAAMULKA SHAQADA CAAFIMAADKA

108 Cherry Street - PO Box 70 Burlington, VT 05402-0070

Taleefanka: 802-6574220 / Fakiska: 802-657-4227

Laynka lacag la'aanka ka ah gudaha Vermont: 800-745-7371

limeylka: AHS.VDHMedicalBoard@vermont.gov

## OGGOLAANSHAHFA SAXIDDA DIIWAANADA CAAFIMAADKA EE CIDDA HAYSA AWOODDA MATALAADDA

### KU SOCOTA CIDDA AY KHUSAYSO:

#### WAXAAN KUUGU OGGOLAANAYAA HALKAN inaad siiso Waaxda Caafimaadka

Vermont, Maamulka Shaqada Caafimaadka, iyo/ama wakiilkeeda idman, iyo Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud, dhammaan diiwaanada caafimaad iyo dhammaan macluumaadka, si bilaa shuruud ah, kuwaasi oo aad adigu hayso ama maamusho ee la xiriira \_\_\_\_\_(Taariikhda Dhalashada \_\_\_\_\_), ha noqdaan qaar afka laga sheegayo ama qoran (oo ay ku jiraan diiwaanada ay ku siiyeen xirfadlayaasha caafimaadka ee kale ama hay'adaha daryeelka caafimaadka,) ee la xiriira wixii ah xaaladda jireed, maskaxeed, garasho ama shucuureed ama dhaawac ama cudur ee laga yaabo in lagaala taliyey ama laga yaabo in adeegyo laguu siiyey. Wuxaan halkan ku caddaynaya in la i siiyey wakaalad ii oggolaanaysa inaan sameeyo tan anigoo ah wakiilka dhabta ee \_\_\_\_\_, iyo in awoodda matalaadda aan laga laaban ama la xaddidin. Nuqlu ah awoodda matalaadda ayaa halkan ku lifaaqan.

Fasaxan oggolaanshaha shaacinta ee gaarka ah oo kaliya la siiyay Waaxda Caafimaadka Vermont, Maamulka Shaqada Caafimaadka, iyo Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud, laakiin aan cid kale la siin, anigoo ka wakiil ah \_\_\_\_\_, waxaan halkan si cad uga TANAASULAYAA qarsoodinimada iyo/ama wixii mudnaan ah ama dhawrsanaan ah ee sharciga Gobolka ama Fadaraalku siiyey, oo ay ku jiraan waxyaalaha ay ka hadleen 42 CFR, Qaybta 2, kuumana qabsan doono la wadaagista macluumaadka Waaxda Caafimaadka Vermont, maamulka Shaqada Caafimaadka, sida uu sheegayo codsigaygu, si ay qiimayn ugu sameeyaan dhinacyo cayiman oo ka mid ah daryeelka caafimaaka la siiyo \_\_\_\_\_.

**OGGOLAANSHAHAN** waa mid laga laaban karo markii la rabo marka laga tago wixii aad horey u samaysay adigoo isku hallaynaya oggolaanshaha. Haddaan horey looga laaban, oggolaanshahan wuxuu soo afjarmi marka tallaabada u dambaysa la qaado, oo ay ku jiraan go'aan maxkamadeed, marka la eego wixii tallaabo ay qaadaan Maamulka Shaqada Caafimaadka ee la xiriira macluumaadkan, ama haddii aan tallaabada noocan ah aan la qaadin, wuxuu oggolaanshuhu soo afjarmi 365 maalmood kadib laga bilaabo taariikhda oggolaanshaha.

**SIDOO KALE WAXA LAGUU OGGOLAADAY** inaad ugu tabiso macluumaadkan, adigoo afka ka sheegaya ama qoraal ahaan ku sheegaya, si toos ah Waaxda Caafimaadka Vermont, Maamulka Shaqada Caafimaadka, ama wakiilkooda idman, iyo Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud, si joogto ah ilaa uu oggolaanshahan wakhtigu ka dhacayo ama laga laga laabanayo.

**NUQULKA SAWIRKA AH EE OGGOLAANSHAHAN WUXUU LA MID YAHAY KIISA  
ASALKA AH.**

Taariikhda \_\_\_\_\_

Magaca \_\_\_\_\_

Far Waawayn ku Qoran

Saxeexa

Cinwaanka

Magaalada, Gobolka, Zip Code-ka